

# **Allow Ciiddayda Boqrany Lagaa Baddalo**

---

**Caasho Sheekh Maxamed**

Illaahow boqorow baryadaada ha igu qadin  
Allow samadaada oo igu beeg ballaqaan  
Allow awoodd buuxda oo aan baaqan lagu aqbalo  
Allow buuggaaga sharafta leh bog lagaga qoro  
Allow u bayaami sida waa baryiyo dharaar

Bulshada baas oo aan abidkeed baraarugayn  
Badaawida aan indhaha biidna ka arkahayn  
Bartii maqalkiyo qalbigu bayd qufulan yihiin  
Bugcad la baassiyo darxumadii ku baaqigaa  
Allow ciiddayda boqrany lagaa badalo  
Allow bulsho garata danaheeda kugu dulbeer  
Allow raga ba'ay dalkaygow lagaa baddalo  
Beesha kala dile illaahow lagaa bud dhigo  
Allow kuwa sharaftii ka boqoolay kaa bannee  
Dushaada allow ku beer wiilal loo baxsado  
Allow aan duugga nacabkeennu kugu dakayn

Bireeyiyo buubiyiyo boobe iyo kufsade  
Been hadlaha sheekta hadba beel inuu xukumo  
Duqowda balbalisa dabku maalintuu bakhtiyo  
Kuwa bannaanada jiroo baas abuurradaa  
Allow ciiddayda boqrany lagaa badalo  
Beesha kala dile illaahow lagaa bud dhigo  
Allow kuwa sharaftii ka boqoolay kaa bannee  
Dushaada allow ku beer wiilal loo baxsado  
Allow aan duugga nacabkeennu kugu dakayn

Buulal diirdiirte isku haysta boqor cadliya  
Beebabkiyo fiiladii qaar kaloo la baxay  
Baahi ruux liitoo baryo dhowra aan wax cunin  
Bireeyoo baarte waligis aan ruuxna bixin  
Allow ciiddayda boqrany lagaa badalo  
Beesha kala dile illaahow lagaa bud dhigo  
Allow kuwa sharaftii ka boqoolay kaa bannee  
Dushaada allow ku beer wiilal loo baxsado  
Allow aan duugga nacabkeennu kugu dakayn

Ugaaska iyo boqorka midba buul hortaagan yahay  
Malaaqyada buunka u afuuфа beel la gubo  
Magaca beel daajiyaan buuriga astawayn  
Haweenka barkood oo raga ba'ay bogaadsha qaar  
Allow ciiddayda boqrany lagaa badalo  
Beesha kala dile illaahow lagaa bud dhigo  
Allow kuwa sharaftii ka boqoolay kaa bannee  
Dushaada allow ku beer wiilal loo baxsado  
Allow aan duugga nacabkeennu kugu dakayn

Qabiilka bah moode ka baraadla' qaran burburay  
Bililiqe u yaace guba buulka hooyadiis  
Barbaarr lagu habay oo anfacoodu hilib dad yahay  
Bayd islaameed ku jire booli shiikh daldala  
Allow ciiddayda boqrany lagaa badalo  
Beesha kala dile illaahow lagaa bud dhigo  
Allow kuwa sharaftii ka boqoolay kaa bannee  
Dushaada allow ku beer wiilal loo baxsado  
Allow aan duugga nacabkeennu kugu dakayn

Jage u baalhaade aan dadnimo ku beegsan karin  
Xabash bugcad u goobe Soomali bohol ku gure  
Badi dalkiisii col dhacay baaqiga ugu dare  
Nacab bogaadihaya aan bar caaqibaa lahayn  
Allow ciiddayda boqrany lagaa badalo  
Beesha kala dile illaahow lagaa bud dhigo  
Allow kuwa sharaftii ka boqoolay kaa bannee  
Dushaada allow ku beer wiilal loo baxsado  
Allow aan duugga nacabkeennu kugu dakayn

BBC-jooge run ka bayre been daldale  
Abidkiba buuqe aan lillaahi soo bandhigin  
Niman diloo booboo aan xataa agoonta bixin  
Oo buulashoodii ku jirra ay ka buubsadeen  
Kan baahsha inay yihii diinta rag u bambaxay  
Isna umaan bogine rabiyow lagaa badalo